

Bronchiolitis (Somali)

Burunkiito



Bronchiolitis waa caabuq badanaa gala feeraha oo ku dhaca dhallaanka ka yar 12 bilood. Infekshanka ama caabuqa wuxuu dhaliyaa barar/guduud iyo xab ku urura marinnada hawadu marto kabacdina ay adkaato in qofku neefsado.

Burunkiitada caadi ahaan waa wax iska fudud. Inta badan dhallaanka waxay ku roonaadaan 7 ilaa 10 maalmood, laakiin qufucu wuu sii jiri karaa ilaa hal bil.

Maxaa sababa?

Burunkiitada waxaa sababi kara fayrasyo kala duwan. Kan ugu caansan waxaa loo yaqaan respiratory syncytial virus (RSV). Infekshanka burunkiitada waa la kala qaadaa wuxuuna si fudud u faafaa marka dadku aysan daboolin afkooda iyo sankooda marka ay qufacayaan ama hindhisayaan. Ka fogee carruurtaada xubnaha qoyska iyo saaxiibada kale marka ay jiran yihiin, si aysan u faafin jeermiskooda.

Calaamadaha xanuunka

Burunkiitada waxay ku bilaabataa calaamadaha hargabka caadiga ah sida:



diif biyo ah



qufac fudud



hindhisada



qandho.

calaamadahaan way ka sii dari karaan dhowr maalmood gudahood:

- Neefsashada degdega ah ama dhib laga maro
- dhawaqa feeraha marka la neefsanayo
- hakad soo kala dhex gala neefsashada
- xanaaq iyo qandho
- quudinta oo dhib laga marayo (tani waxaa u sabab ah dhallaanku waxay ka neefsadaan sanko oo keliya).

Xanuunka burunkiitada inta badan waxay ugu sii daraan tahay habeenkii. Inta badan carruurta waxay soo roonaadaan 4 maalmood ka dib.



Infekshanka waxa laga yaabaa inuu usii daran yahay oo uu ku sii daba-dheeraado carruurta ka yar 3 bilood, dhallaanka dhiciska ah ama carruurta qabta dhibaatooyinka sambabada ama wadnaha.

Daawaynta

Ma jirto daawo ama antibiyootik lagu daaweyn karo burunkiitada. Haddii ilmahaagu qabo burunkiito, waxaad daweyn kartaa oo keliya calaamadaha jirrada si ay uga caawiso inuu qofku roonaado.

Dhallaanka qaba infekshan aad u daran waxaa la dhigi karaa isbitaalka halkaasoo lagula socon karo laguna daweyn karo qoyaan/ama ogsijiin.

Daryeelka guriga

Inta badan dhallaanka qaba burunkiitada waxaa lagu daweyn karaa guriga. Kuwan ayaa ah waxyaabo aad sameyn kartid:

- sii ilmahaaga paracetamol (qiyaas lagu taliyay) si ay uga caawiso inay roonaadaan. Raac tilmaamaha ku yaal dhalada ama xirmada ay daawada ku jirto si aad u ogaatid qiyaasta saxda ah. Ha siin ilmahaaga wax ka badan inta lagu taliyay.
- Hubi in ilmahaagu helayo cabitaan ku filan. Haddii aad naas nuujiso, raashin yar oo la siiyo marar badan ayaa laga yaabaa inay caawiso.
- sankooda ku nadiifi dhibco biyo cusbo leh ah ama tan sanko lagu buufiyo. Waxaad ka heli kartaa farmashiyaha.
- Ilmahaaga ka fogee qiiqa sigaarka.

Haddii aad wax welwel ah ka qabtid xaaladda ilmahaaga, wac 13 HEALTH (13 43 25 84) si aad ula hadashid kalkaaliso diiwaangashan 24 saac maalintii, todobada maalmood ee isbuucii qiimaha wicitaankana wuxuu la mid yahay adoo wacaya meel ka mid ah xaafada aad degan tahay.



Weydiiso turjubaan haddii aad mid u baahan tahay.

Goorta loo baahan yahay in la arko dhakhtar

La tasho GP-gaaga haddii u ilmahaagu leeyahay wax calaamadihii boronkiitada ah. Way baari karaan ilmahaaga oo waxay ku siin karaan daawada saxda ah.

Dhallaanka uu ku dhaco burunkiitada qaar waxay halis ugu jiraan inay si degdeg ah aad ugu xanuunsadaan .

Tag qaybta gargaarka degdega ah (emergency department) ee kuugu dhow haddii ilmahaagu qabo calaamadaha burunkiitada oo uu:

- ku dhashay dhicisnimo
- ka yar yahay 3 bilood
- oo uu sambabada ka qabo cuduro daba-dheeraaday, wadne xanuunka lagu dhasho ama difaaca jirkiisu uu hooseeyo (oo ay leeyihiin difaac daciif ah)
- oo uu yahay Aboriginal ama Torres Strait Islander
- oo uu aad u hurdo badan yahay ayna adagtahay in la toosiyo
- ama uu u muuqdo mid uu maqaarka jirkiisu ka dhiig furan yahay sidii caadiga ahayd, sidii dhidid iyo/ama u eg buluug oo kale.

Wac Seddexda Ebar (000) haddii ilmahaagu ay ku adag tahay neefsashada ama haddii faruuryaha isu beddelaan buluug.

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmada Degdegga ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Waxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelayaasha.

Resource ID: FS006 **Reviewed:** July 2022

Cudur-daar: Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyadoo ujeedaduna tahay in loo isticmaalo tilmaame kaliya waxaana loogu talagalay in lagu taageero, balse aysan beddelin, wadhadalka dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacayso nuqulkii ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markaas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.